

Qoysaska iyo Shaqaalaha Qaaliga ee Dugsiyada Dadweynaha Portland:

Waxaan idiinka mahadcelineynaa taageerada joogta ah ee aad nala garab taagan tihiin xilligan jiilaalka aan caadiga aheyni jiro.

Waxaan fahamsanahay oo aan idinla wadaageynaa jahawareerkan in tiro iskuulada ka mid ahi ay xiran yihiin waxaan jecelnahay inaan idinla socodsiiino wixii cusub ee ku saabsan sidii aan u soo bogi lahayn maalmihii waxbarasho ee lumay shanta bilood ee soo socda ee sanad-dugsiyeedkan.

Golaha Waxbarashadu waxa uu u codeeyey bishii Diisember 13keedii, 2016, in lagu daro labo maalmood dhammaadka sanad-dugsiyeedka si labadii maalmood ee lumay Diisember loo soo bogo. Codeyntaas ka dib waxaa iskuuladii la xiray maalmo dheeraad ah taasi oo ay sababtay cimilada xumaatay.

Tallaadadani, Janaayo 17keeda, shaqaalaha degmadu waxay soo bandhigi doonaan talo-soo-jeedintani soo socota si uu Golaha Waxbarashadu tixgalin u siiyo waxa laga yeelayo maalmihii kale ee iskuuladu ay xirnaayeen, waana kuwan talo-soo-jeedimihii :

- In lagu daro maalin kale jadwalka iskuulka ee la kordhiyey saddex maalmood oo ay noqoto maalinta iskuulka ugu dambeysa Juun 14keeda, 2017.
- In meesha laga saaro maalmihii dugsiyada hoose ay furmi jireen subaxii goor dambe iyo dugsiyada dhexe , sidoo kalena la joojiyo dugsiyadii sare ee maalmaha qaarkood hore loo fasaxi jiray, taasi waxay soo bogi doontaa ugu yaraan toban saacadood oo waxbarasho dugsiyada hoose iyo afar saacadood oo dugsiyada sare ah.

Fadlan waxaad ogaataan haddii la ansixiyo in la joojiyo iskuulkii subaxii goor dambe bilaabmi jiray wuxuu ka bilaabmi doonaa **Arbacadani, Janaayo 18, 2017.**

Waxaan aqoonsanahay in tallaabooyinkani ayna bogi doonin dhammaan maalmihii ay iskuuladu xirnaayeen markaa waxaan la shaqeyneynaa Waaxda Waxbarashada Gobolka Oregon anaka oo iskaashi la sameyneyna Iskuulada kale ee degmada ee gobolka oo dhammaantood ay soo waajahday xaalada isku midka ahi, sidii aanu sida ugu wanaagsan u

qiimeyn lahayn xaalada, iyadoo aan rajeyneyno in ay iman karto in iskuulada la xiro taasi oo ay sababto xiligan aan ku jirno jiilaalkani.

Marka aanu warar dheeraad ah ka helno shaqadan aan heyno wixii ka soo kordha waa idinla socodsiin doonaa.

Ugu dambeyn, wax aan aad uga shaqeyneynaa iskuuladeenii inaan nadiifno goobaha laga soo galo, goobaha lagu lugooyo iyo goobaha baabuurta la dhigto iyadoo aan iskuuladeena ka dhigeyno kuwa aan waxyeelo ka soo gaarin ardeyda iyo shaqaalaha maalinta Tallaadadana diyaar u ah in dib loo furo. Wixii macluumaad faahfaahsan ee ku saabsan arrintani waan idinla soo socodsiin doonaa maalmaha Sabtida iyo Axada. Mudnaantayada koowaad waxay tahay in aan xaqiijino in iskuuladeenu noqdaan kuwa si nabadgelyo leh ay ugu soo noqon karaan ardeyda iyo shaqaaluhu, iyadoo aan geyneyno wax kasta oo ay u baahan yihiin si loo gaaro hadafka aan higsaneyno maalinta Tallaadada ah.

Mar labaad waan idiin mahadnaqneynaa taageeradiina. Fadlan waxaan idiin rajeyneynaa nabadgelyo anakoo sidoo kalena rajeyneyna in aan ku soo noqono dhammaanteen ardey iyo shaqaalaba sida ugu dhakhso badan iskuuladii.

Daacadnimo,

Bob McKean

Guddoomiyaha Ku-Meel-Gaarka Waxbarashada